Qoyska Xaanshida Xaqiiqada

# Natiijada Togan:

## Ogeysiinta Natiijada Dhiigga Laga Qaaday Ciribta

Barnaamijka Baaritaanka ilmaha dhasha ee Minnesota

**Absent/Reduced Biotinidase (BTD), Family Fact Sheet—Somali**

# Biotinidase Maqan/La yareeyay (BTD)

### Maxaa lagu ogaaday baaritaanka dhallaanka cusub?

Baaritaanka ilmaha dhashay oo la sameeyay ayaa lagu ogaaday in ilmahaagu qabin ama uu qabo heerarka hooseeya ee maadada enzyme oo la yiraahdo biotinidase.

### Maxay tani ka dhigan tahay?

Maqnaanshaha ama heerarka hooseeya ee biotinidase ayaa muujin kara in ilmahaagu qabi karo cilada yaraanta biotinidase. Natiijada laga helay ayaan ka dhignayn in ilmahaagu qabo ciladaha yaraanta biotinidase, laakiin baaritaan ayaa loo baahan yahay si loo xaqiijiyo.

### Maxaa xiga oo dhici kara?

Dhakhtarka ilmahaaga ama taqasuslaha aqoonta u leh cilad yaraanta biotinidase ayaa kaa caawin doona diyaarinta baaritaan dheeraad ah oo laga yaabaa inuu ilmahaaga u bilaabo feetamiino gaar ah. Ilmahaaga ayaa sidoo kale loo mudeyn doonaa taqasuslaha dheefshiidka.

### Waa maxay cilada yaraanta biotinidase?

Cilada yaraanta biotinidase waa xanuun ay qabaan ilmuhu marka ay dhashaan markaas oo uusan ilmuhu awoodin inuu adeegsado uuna dib u isticmaalo feetamiinka, biotin. Biotin wuxuu ka yimaadaa cuntada waxaana loogu baahan yahay awooda iyo kobaca.  Waxaa jira labada nooc ee cilada yaraanta biotinidase: mid qayb ah (fudud) iyo wayn (daran). Labada noocba waxay sababi karaan dhibaatooyin caafimaad.

### Waa maxay dhibaatooynka caafimaad ee uu keeni karo?

Cilada yaraanta biotinidase waa xanuun qofku abidkiis qabaayo. Haddii aan la daaweyn, wuxuu sababi karaa:

- Daciifidda murqaha
- Dhibaatooyinka maqalka iyo aragga
- Luminta timaha
- Finanka maqaarka
- Qalalka
- Naafooyinka caqliga

Carruurta qaba ciladaha yaraanta biotinidase ayaa ka faa'iideysan kara daawaynta degdega ah ee taxadarka badan.

### Waa maxay fursadaha daaweynta ee jira?

Inkasta oo aan ciladaha yaraanta biotinidase daawo lahayn, haddana waa la maarayn karaa. Carruurta qaba ciladaha yaraanta biotinidase ayaa lagu daweeyaa kaalmaatiga biotin intay nool yihiin oo dhan. Haddii la daweeyo kahor inta aan astaamuhu soo muuqan, ilmaha ayaa heli kara kobac iyo koriimo caafimaad leh.

Ilmaha qaba ciladaha yaraanta biotinidase waa inay u tagaan dhakhtarkooda caadiga ah iyo dhakhtar ku taqasusay ciladaha yaraanta biotinidase.

## Dhigaalada

**Tixraaca Macluumaadka Hiddo-sidaha:**
http://ghr.nlm.nih.gov

**Badbaadi dhallaankaaga Adoo U Maraya Baaritaano Aasaasi ah:**
www.savebabies.org

**Baaritaanka Koowaad ee Dhallaanka:**
www.babysfirsttest.org

DEPARTMENT OF HEALTH
Newborn Screening Program, 601 Robert St. N., St. Paul, MN 55155
Taleefanka (800) 664-7772, Fakiska (651) 215-6285 ***turjumaano ayaa diyaar ah**
DIB-LOO-EEGAY 07/2018